

#sooyaalka Soomaalida & adeegsiga RINJIGA.



#maqaalkaan qaabka, aan uqoray wax waad ka bedeli kartaa sida adiga kula quman, qalinkaaga waad noogu soo gudbin kartaa.

#kani waa maqaal lagu soo koobay wax walba oo ku saabsan MIDABADDA.

magacyada eey leeyihiin midabbada afsomali ahaan /Carabi+ English/

-UJEEDO: Danta aan ka leeyahay soo uruurinta moowduucaan waxeey tahay in aan BULSHADEEYDA SOOMAALIYEED & CAALAMKABA, IN AAN USOO WADO CILMI CUSUB , ADUUNKA, AADANAHA KUNOOL CID KAAGA HOREEYSAY AYAA JIRTO CILMI AAN IS LEEYAHAY IN AAN LA WADAAGO BULSHADA SOOMAALIYEED. ALIF ILAA YA WAA INTAAS UJEEDKA, AAN KA LEEYAHAY . CILMIGAAS CUSUBI , MAQAALKAAN GUDAHIISA KUMA QORNA . MAQAAL KALE AYAAN KUSOO BANDHIGI DOONAA.

#sooyaalka Soomaalida & adeegsiga RINJIGA.

-Inageey HARGEYSA .

kaalay oo nala daawo .

Laas Geel darbigeeda waxaa ku xardhan qiyaastii 350 sawirro.

2003 Ayaa laga warhelay in eey jiraan godadkaas, waxa ku dhex sawirana weey inoomuuqdaan.

bal kawaran haduusan midab jiri leheen sidee noqon leeyd aduunka ?

gaduud,jirin, madow ,jirin, cagaar, jaale. maxaa dhici lahaa markaas ?

miyaad wax arki laheeyd , hadii aad wax aragtid sideed ku kala saari laheeyd waxaadba ujeedid.



caaynba-caayn ,calmashada indhaha

#taya xumada RINJIGA maanta yaalo aduunka.

Kaamirada ku agtaalo Sawirka lagaaga qaaday imisa sano ayuu dunida sii ooli karaa?

200 sano kadib waa dhintay sawirkaas .

- wax sawirrid marka lasoo hadal qaado somalida meelaha eey xasaasiyada kaqabto, aqoonbadan waan uleeyahay, dhankaas kaba hadli maayo

waxa aan ka hadlaayo, ayaa, ah MIDAB , ama kalar ama khad ama, ANQAAs, ama DAWAAD


midaa doontid ku magacaawe imisa sano ayeey sii ooli kartaa hadii loox lagu dhigo, ama dhagxaan lagu dulqoro?.

sida igu maqaala ah waxaa jiro RINJI bug ah (aanan eheeyn asli) kaas bugta ah dhaqso ayuu dabar go`aa.

=====

#WEEDHSAME & WEEYDIINTIISA MIDABKA.





Abwaan weedhsame (2021)

su`aal ayuu kusoo qoray bartiisa (FB) wuxuuna bulshada weeydiiyay.

MIDABYADA, yaa iigu sheegi karo AFsomalí ahaan ?.

waatan jawaabtii eey ka bixiyeen aqrista yaashiisa.

-Layla Suuban, gabar lagu magacaabo waxeey sooqortay sida tan.

-Casaan.Buluug.Basali.Huruud.Buni.Soosali.Madaw.

Cadaan.Akhtar /cagaar.Liimi.Sibidhi.Cadaan xigeen/cadaan biyo dhac ah/cadaan badhxan.

Akhtar biyo dhac ah/badhxan.

Buni rasiin ah.Akhtar jebis.

Danbari.Dahabi.Buluug fadhiya.
Akhtax cawlaan ah.Buluug maarayn.
Xinjiri.Baardoo

gabar lagu magacaabo (Huda Abz) iyadana waxeey sooqortay
sidaan.

-Casan.Buluug.Basali.Huruud.Buni.Soosali.Madow.
Cadaan.Akhtar.Liimi.Sibidhi.Akhtar Xigeen.
Beerdoo.Kaaki ama xareed.Rasiin Buni ah.
Buluug Maree.Dahabi.

labadaas gabar ayaan kasoo qaadanay dadkii tirada badnaa, ee
warcelinta kasoo bixiyay su`aashii ABWAANKA.

magacyada qaabka eey iskugu xigaan,eeg sawirrka sare

#JIRJIROOLE-YAASHA ,15 KABADAN .

Noole kale majiraa, anaan aheeyn Jir-jiroole , midabka
bedelankaro?.


nooolayaasha aduunka mid walba awoodiisa gaarka ah ayuu
leeyahay.

inaga jirjiroole ayaa naqaanaa , isagaa nala joogo.

midab kiisa isbedel inuu ku sameeyo awoodeeda in lasiiyay
waan aragnaa,laakiin waxaan bulshadeena lawadaagayaa in eey
jiraan noolayaal kale .

-ku qor (g00gle)kana baar magacyadaan hoos kudhigan
waxaad ku arki doontaa noolayaal badan oo sida jirjiroolaha,
hadba midab lasoo baxo.

tusaale ahaan hadii aan uqaadano, bal eeg shinbirkaan.
mar walba waxuu midabkiisa yeeshaa meesha oow ku
noolyahay markaas



1-scrawled filefish .

2-Peacock Flounder.

3-Mimic Octopus

4-Green Anole

5-Golden Tortoise Beetle

6-Grey Tree Frog

7-Rock Ptarmigan

8-Flamboyant Cuttlefish

9-Peron's Tree Frog

10-Pygmy Seahorse

11-Hogfish

12-Caribbean Reef Squid

13-Peacock Cichlid

14-Australian Giant Cuttlefish

15-Stoat

16-Chameleons.

[abeeso =Nooc halaqyada ka mid ah,oo hadba ciidda ay ku nooshahay midabkeeda yeelato.]

#midabo, igu cusub maqalkooga.

-aqriste mar walba niyada ku haay waxa aan soo xulay wax aan is leeyahay umada weey iloowday ama weey ku adag tahay in eey afsoomaali ahaan ku sheegaan . hadii aad aragtid erey sida, aad utaqiinay aanan loo macneeynin , qaladka dhinaceeyga maahin ee waa dhanka QAAMUUSKA AFKA

SOMALIGA.(Qaamuusyada Afka somaliga weli waa qabyo, qormo ayaa

kusocoto ereyo badan ayaa kadhiman ,afyaqaanka hoowshiisa, ayaa, ah, halka hebel ku hakiyay qoraalka horay uga sii dhaqaaji, inta kadhiman kusii dar) isaga, ayaan kasoo xiganayaa, ereyadaan badan kooda. laga yaabee, in aan kasoo tago ereyga leesla yaqiinay kana soo qaato erey maqalkiisa nagu cusub yahay laakiin qaamuuska noogu dhigan , xulashada, ereyga waxuu ku xiran yahay moowduuca, aan cilmi baarista ku wadno moowduuca MIDABBADA. wax walba oo kusaabsan MIDAB waan soo rarnay.

tusaale:sadaxdaan eray.kan midabka quseeyo ayaan ka qaadanay.

1-mood= Maalka inta aan xoolaha nool ahayn.

2-mood=Erey duco ah oo madaxda loo dabbaaldegayo lagu yiraahdo; raag!.

3-Mood=Qorraxdu marka ay soo baxayso fallaaraheeda caadka qabta ee midabka quruxda badan yeesha.

Ereyada lasoo gaabiyay , aad qormada ku arki doontid.

cagaar & madoow.

cagaar & madoow.

[iyo=&.]

#Waamaxay midabyo?

-MIDAB (-midabbo/-midabyo) = Marka

fallaaraha ilaysku ku dhacaan walax ee ay kasoo noqdaan,

muunadda ay isha tusaan: sida casaan, cagaar iwm.

-Namuun (namuunad, namuuno.)= Nooc ama Midab.

-maaleeyo =Hoore kasta oo midab aad u madow leh. Dheecaan aad u madow, oo geedaha qaarkood dhalaan.

-maar=Macdan cawlan, jilicsan,

-maarriin = Midab dadka u gaar ah oo u dhexeeya casaan iyo madowga.

-maar=Midab, guduud madow yari ku jiro ah oo lo'du yeelato

-maas(=5)Midab guduud xigeen ah oo geelu yeesho.

-marbuuc/marbooc/murbooc= Dhar midab cad leh oo baftada ka jurmi weyn kana adag.

-midabdoori = Wax midab ka beddelid.

-mooska(3)muuska markuu bislaado midabkiisu waa cawl dahabka u eg.

-muqshabeel=Qof ay iska dhaleen dheddig & lab kala midab ah.Harimcad.

-muraayad.biladdaye= Cad dhalo ah oo dhan midab dheeh lacageed ah & rinji ka marsan yahay oo la iska arko ama muuqaalka soo celisa.

-maajeen=Midab guduud boor xigeen ah oo ay lo'du yeelato.

-midabciira ah.

-midab dambas ah.

-Midab ka kooban caddaan & casaan khafiif ah= Ashkir.(Ashkiri ayaan dhihi lahaa aniga)

-midab hurdi ah

-midab laawe ayaa jiro waxaa kamid ah kuwaas aanan midabka leheeyn ,Neefta/hawada,Baasiinka iwm.

-midab guduud & caddaan u dhexeeya.

-Midab ciira boos ah oo casaan yar ku dheehanyahay.

-Midab ciira boos ah oo caddaan xiggeen ah.

-Midab caddaan caawl ku dheehan.

-midab baraashirix ah=Digiranka & shimbiraha la midka ah ayaa leh midabkaas.

-midab ciiro madow xigeen ah.

-Midab buluug khafiif ah sida midabka cirka.

-midab huruud cagaarxigeen ah

-galayax = Wax midabkiisu cad yahay.

-casaanboor =Midab casaan ah oo caddaan & madow ku dhafan yahay.

-hurdi cagaaran =shey midabkiisu yahay hurdi cagaaran.

-gibilmadow = Dadka midabkiisu madow yahay.

-shey midabkiisu booranyahay

-sheey midabkiisu yahay baroor-cas

-sheey midabkiisu cawl yahay.

(tusaale: Libaax lab ah qaarka horana ku leh shaash midabkiisuna cawl yahay.

-sheey midabkiisu casaan xigeen ah

-sheey midabkiisu huruudcagaar ah

-sheey midabkiisu yahay buluug madow

- sheey midabkiisu isdhalanrogo ayaa jiro.
- sheey midab-geddoonsamay
- sheey leh baro badan oo kala jaad ah waxaa la dhahaa
=baraacuud
- fiil =Midab cad oo geela & farduhu yeshaan.
- shiilmadow=Dhagax midab madow leh oo aad u adag.
- shiil= Dhagax dab lagu kululeeyey oo caddaaday.
- Mood =Qorraxdu marka ay soo baxayso fallaaraheeda caadka
qabta ee midabka quruxda badan yeesha.
- sagal = Daliigo cas-cas oo moodda galbeed u eg oo xilliga
roobka aroortii cirka ku dhigma.
- daalac= Dayax ama qorrax soo muuqasho.
- haldhaa =Gorayada keedalab.(haldhaa=madoow/Tuke=
madoow/dhuxul= madoow)
- gorod=Neef madaxa midab gaar ah ku leh;neef gordan.
- sugul= midab aad u madow.
- dugul =midab aad u madow.
- midab bey madow ah.

-aargoonle =Nooc dawacada ka mid ah,midab bey madow ah leh

-aranjaato =Cabbitaan laga sameeyo liinxali, biyo & sonkor oo midab hurdi ah leh.

-baqalye =Jaad ka mid ah haadda hilibcunka ah oo galleyrka u eg, lehna midab

ciira ah lugahana u cas. /baqalyo,/ baqaye.

-bacayr/dhusaas/= Jaad ugaarta ka mid ah,lehna midab dambas ah .

-abuurcas =Nooc meseggada ka mid ah,oo midab guduud & caddaan u dhexeeyaleh.

-asaay /weer./ asay =Dhar midab cad ama madow leh oo afadu qaadata marka ninkeedu dhinto

-asal(-asalay, -asashay; -asli) Wax midab u yeelid.

-ashkir=Midab fardood ka kooban caddaan & casaan khafiif ah.

-baalash =Rinji midabbo badan leh oo gasacado yaryar ku jira oo kabaha la mariyo,/luujito./ Burush.

-bacad=Midab caddaan ah oo mid kale oo yari ku dhafanyahay oo geelu yeesho.

-bar=Goobaabin yar oo meesha ku taal midab ka duwan leh.

-baraacuud =Baro badan oo isugu jira midabbo kala duwan.

-barni=Nooc ka mid ah jaadadka timirta,leh midab bunnii ah.

-baroor=Midab caddaan boor leh ah oo ayfarduhu yeeshaan.

-baxarsaaf/baahirsaaft.= Geed weyn, laamo dhaadheer & caleemo dhuudhuuban oo **midab casuur ah** leh oo meesha uu ku yaal aysan kaneecadu imaan.

-bood=Midab caddaan caawl ku dheehan ah oo ay fardaha yeeshaan.

-biif(biifid.)=midab aad u cad; qurux.

-bood=Dhoobo cad.

-boore = midab u eg kan dambaska.

-boosh=Midab aad u cad oo ay yeeshaan timaha,dhogorta iwm.

-boosh cadde =Nooc bariiska ka mid ah oo aad u tarma marka la kariyo.

-bullaale =Faras midabka dambarka leh.

-bey=Midab cad oo madow yari ku dheehanyahay oo ay yeeshaan lo'da, fardaha & riyaha.

-beycad =Midab ciira boos ah oo caddaan xigdeen ah oo ay yeeshaan lo'da & fardaha./giircad.

-beycas./ beyguduud. =Midab ciira boos ah oo casaan yar ku dheehanyahay oo ay yeeshaan lo'da fardaha & riyaha.

-beydacar (beydacarro) =Bey midab dacar ah leh

-beyguduud= bey guduud ku dhafanyahay.Midab lo'aad ah,beycas.

-beymadow./giirmadow=Midab bey ah oo madowgu ku badan yahay..

-biciid =Jaad ugaarta ka mid ah,leh midab dacar ah.

-qawad=Cudur haragga dadka ku dhaca oo baro cadcad u yeela./Midab baraashirix ah oo lo'da ariga & farduhu yeeshaan./

#C.

ABWAAN DHOODAAN AYAA KA GABYAY CEENLEED .

Netka waad ka heli kartaa gabaygiisa.

-caddaanbuluug =Midab cadd buluug xigdeen ah.

-caddaansadaf = Midab caddaan xigeen ah oo dhalaal ku jiro.

-caddaan-qalimeed.

-casuuro =Midab casaan xigeen ah.

-dahabi-cas

-calcalyo =Biyo xareed, saafi ah.

-Calas=midab casaan xigeen ah; maarniin.

-Calas=Biyo ama fuud aan miir ahayn calow galay, qasan. /

Midabyo isku laban

(xoolaha).

-calow=biyo dhoobo ku qasantahay/ midab calas ah.

-camaajiir =Midab caddaan & madow ama caddaan & casaan

isugu jira oo ay yeeshaan

lo'da & riyaha.

-carab=Midab lo'da & riyuhu yeeshaan oo casaan & caddaan

isbarxay ah.

-caraw =Midab cawl ah.

-cardiif =Midab caddaan xigeen ah.

-carwaajiis =Midab guduud furan ah.

-casaanboor =Midab casaan ah oo caddaan & madow ku dhafan yahay.

-casuus =Midab cas oo caddaan ku jiro.

-cawiif = Midab cad oo boor ku dhafanyahay.

-cawl=Midab casaan xigeen ah.

-caynab = midab madow oo farduhu yeeshaan.

-cawlan = Wax midab cawl ah leh ahaansho.

-cadaan cubdi ah =cadaansuuf.

-casaan sugul barxay.

#D.

-dawacomadow/dacawamadow. =Nooc dawacada ka mid ah, midab ciiro ah leh, oo caws ku nool ah.

-dahab =Macdan qaali ah, midab cawlan leh,dhalaasha, aan daxalaysan

--bambas= Midab ciira boos ah.

-dameer= Labka gammaan la rarto, leh midab bey ah.

-dameerfarow =Dameer weyn, banjoog ah oo leh midab diillimo caddaan &madow ah./farow.

-deyl =Midab madow oo ku dherersan macasha ilaa sakaarka idaha.

-dooy =Dhul ciiddiisu midab gaduudan leedahay.

-dugul = midab aad u madow.

-dhiin= Midab aad u guduudan.

-dhiinmeged =Midab lo'aad dhiin ah oo yara madow ku jiro.

-dhalaal culay ah = midab madoow oo ifaayo.

-digiiran /digirin/=Nooc shimbiraha ka mid ah oo digaagga ka weyn, aan meel fog u duulin, leh midab baraashirix qurxoon, oo hilibkiisa lacuno.

#G.

-gaaf(.8)=Midab geelu yeesho oo madow xigeen ah

-gaashi/geesho./gaasho =Bar weyn oo midab ah oo ku taal neef xoola ah oogadiisa. ,

-gabar=Midab madow oo iduhu dhabarka ku yeeshaan.

-galayax =Wax midabkiisu cad yahay.

-garaammurux/galaammurux. =Waxyaalo aan isku midab ekayn oo isku darsamay oo midab hor leh oo isku googoo'an yeeshay.

-geeldhugeeye/jirjirroole= Xamaarato yar oo hadba midab isu yeesha; .

(geelrugeeye/ geel-ururugleeye.)

-geyngeyn =Midab lo'da & riyaha oo ah midabbo badan oo isku dhafan, meel loo raacana, aan lahayn. / Baro uskag ah.

-giir=Madow & caddaan si isle'eg isuga jira.

-giircad =Midab madow oo caddaan badani ku dhafanyahay.

-giircas =Midab guduudan oo caddaan yari ku dhafanyahay.

-giirbaq =Midab giir ah oo midabbo kale ku dhafanyihiin

-giirgiir= Midab ay yeeshaan lo'da & riyaha oo baro dambas madow ah oo meelo kala duwan oogada kaga yaal.

-giirmadow =Midab cad oo madow badani ku dhafan yahay.

-goodir =Ugaar weyn oo leh geeso dhaadheer oo marooqsan.

-goodircad =Midab geel oo ah madow caddaan ku badan yahay.

-goodirmadow = Midab geel oo ah caddaan madow ku badanyahay

-haybe /hurree=Midab madow-dhalaal ah.

-horog =Midab madow oo xooluhu qaarka hore ku yeeshaan.

-hurdi=Midab u dhexeeya midabka cagaarka & kan liinta una eg midabka sacfaraanka.

-kaaki = Dhar adag oo badanaa askartu xirato, Midab ahaana udhow midabka casuura.

-jeegaan/qaanso-roobaad/caasha-carrabdheer/kaynroobaad.

-koorasaar =Midab madow oo neef ido ah dusha uga yaal.

-huruushad = Dhuxul noqosho .

-dambas =Budo midab ciira boos ah leh oo ka harta dhuxul bastay.

-fiil =Midab cad oo geela & farduhu yeshaan.

-firdhis = dhoowr barood oo yaryar oo midab ah oo neef cad oo xoolaad jirkiisa ku firirsan .

-libaaxu midabkiisu waa coowl.

-liimo=Midabka dharka lagu naqshadeeyo. .

=====

- Xarar/naqash =midab wax lagu qurxiyo.
- nugaal= Midab madow oo lo'da u gaar ah.
- nuuriyad/nuurad/nuuriyo= Maaddo midab cad leh oo laga helo dhagxaan si gaar ah loo gubay, dhismayaashana lagu dhiso ama lagu caddeeyaa.
- qaaje/qaajay=Qof midabka jirkiisa & tintiisaba aad u casyihiin. .
- qaajeer /qaanjeer=Uskag cad oo jirka dadka, dharka iwm ku samaysma marka uu dhidid ama qoyaan gaaro isaga oo wasaq leh.
- rinji/ranji= Midab; dheeh; asal.
- sabbakh=Asal dharka lagu midabeeyo.
- sacfaraan =Budo hurdi ah oo wax lagu midabeeyo.
- shabeel =Dugaag leh midab cawl ah oo baro baro madow ku dhex jiraan.
- shaqad = .(ri' midab madow & bar cad isugu jira leh.
- shiilmadow/shiilamadow = Dhagax midab madow leh oo aad u adag. .
- soomal =Midab caddaan furan ah oo geela iyo iwm. yeeshaan.

-soomal-may =Midab caddaan & guduud furan isugu jira oo geelu yeesho.

-sugul= midab aad u madow.

-uuro=Boor ama qiiq madow oo kacay

-uuro=Midab xooluhu yeeshaan oo madow, guduud & cawl isugu dhafan.

-waraasi =Midab cawl ah oo lo'du yeelato.

-woob =Midab hurdi ah.

-xildiid = Xabag midab dambar-cad leh, ur silloon.

-yusur =Madow dhalaalaya (midabdad).


=====

NUUCYADDA loo kala qaado midabka Liimiga ah, Oranji ama burtuqaali.

Liimi ayaan dhahnay liinta waa nuucya badan tahay liin dhanaan loolama jeedin ee waa liin bambeelmo ama liin macaan .

midabkaas waxaa la wadaago qudaar badan , sida Bocor Hindi ,[yaqdhiini, carabta] karooto

=====



-Geesaha Maroodiga.(fool maroodi)

waxaa jiro midab la dhaho (geesmaroodi) midabka geesaha Maroodiga.

carabtana waxeey ugu yeeraan (al loon al caaji)

-gorod=Madax./ Qaarka hore ee xoolaha.

-bacad (-bacaddo/-bacadyo) = Dhul bacaad buuxiyay oo lamaddegaan ah.

Midabka kaakiga waxuu dhanxigaa, fool maroodiga weey isku qaab egyihiin waloow midabka kaakiga lagu magacaabay nuucyo badan .

Kaaki ifaayo ayaa jiro kaaki cagaar xigeen ah waa jiraa .

-midab aadan ka helin marka aad rabtid inaad tilmaamtid
waxaad dhihi kartaa, midab cayn silloon iwm.

=====

#sheeko:Webiga Shanta Midab, ama Webiga Qaansa-roobaad
(Cano Cristales)

-waa mid kamid ah webiyada ugu cajiibka badan caalamka.
- (Cano Cristales river) oo ku yaalla dalka Kolombiya, waa mid
aan ka duwanayn qulqul biyoodka webiyada caalamka
Hayeeshe xilli kooban oo kamid ah waqtiga, wuxuu yeeshaa
muuqaal ku xardhan midabyo kala jaadad ah. Ubaxyada yaryar
ee ka hoos baxaya biyaha guntooda ayaa iska leh sababtaas.
webiga oo dhan waxaa daboola midabyo kala jaadad ah sida
midabcireedka, cagaarka & casaanka oo ay u dhaxeeyaan
lakabyo ama hoosiis. Laakiin muuqaalkaas quruxda leh wuxuu
ku idlaadaa maalmo kooban oo u dhaxeeysa deyrta & jiilaalka.
Balse taas ayaaba kasii dhigi karta mid xiiso goonni ah
xanbaarsan.

Nasiib-darro, webiga (Cano Cristales)wuxuu ku yaallaa meel
aad uga fog dadka oo ku taalla duleedka (La Macarena).

Gaadiidka kaliya ee lagu gaari karo ayaana ah faras ama baqal.
Si kastaba, ha ahaatee webigaas waxaa marmar lagu sifeeyaa
webiga ugu quruxda badan webiyada.

#Sooyaalka MAQDASHA & Midab adeegsiga.

Ilbaxnimadii Umadeena lahaan jirtay ,diiwaanka caalamka
ayeey ku xardhan yihiin

hadii aan waxyar nooga iftiimiyo. Somalida waxeey beryahaan
aad u aqrisaa IBNU BATUUTA

socdaal kiisii ZEYLAC ILAA MUQDISHO & MAMBAASA.

war la ogyahay xiiso maleh laakiin waxaan jecleestay in aan
Umdeena xusuusiyo ,

magaalada hoowlo badan ayaa kasocday oo dhar aad uqurux
badan oo dibada loo dhoofiyo

ayaa lagu dhex suubinjay , maro BAFTO ah ama macawiis

ALIINDI AH in aanan laga jecleeyn Masar cid walbaa og, qisada

ninkaas ka hadlay qofkii sifiican udhuuxo waxuu ogaanayaa in dhar midabo quruxbadan dadkeena farsameen jireen .

RINJIGA & ADEEGSIGA SOOMAAALIDA hadii aan qalinka usoo qaadanay ,qeeybta sarena aan kusoo bandhignay gidaarada HARGEEYSA midabada lagu xardhay 5000 sano kahor.umuuraha sooyaalka reermagaalnimada somalida , waxaan udaayay dhalinyarada ku hoowlan arimahaas ineey daboolka kafeeydaan digsiyadii ilbaxnimada lagu karin jiray .

1-aliindi = Dhar gacanta lagu sameeyo, adag,
midabbo iyo noocyo badan leh, oo
Soomaaliya lagu sameeyo. / iliindi.

--

2-bafto (baftooyin) Dhar cudbi ka samaysan, aad u cad, fudud, quruxsan oo go'yo shaarar iwm laga tosho.

=====

#Qalanjadii kashiftay Quraafaadkii Qorraxda.

-qoraxeey midabkaa?=
موشور



[Qormadaan Qoraxda sida eey usameey-santahay looga
waramaayo waxaa qoray oon kasoo qaadanay

"Cabdullaahi M. Cawsey"

cilmiga qoraxda & cilmiga siyaasada aniga ahaan
jaamacad uma gelin mana aqaano maadooyinkaas ,saas
daraadeed moowduucan ku saabsan Midabbada ka hadal
kooda wax shaqo ah kuma lahan siyaasad.

maado aadan aqoonin hadii eey qasab kugu noqoto in
aad ka hadashid , waa gar ,walaalka Soomaliga kula ah
inaad marti uga noqotid maadadaas.

Qalanjadii kashiftay Quraafaadkii Qorraxda.

Nin walba oo nin-karmeed ah wuxuu qirsan yahay in
noloshiisa mar uu la

kulmay qalanjo qurux badan oo qalbigiisa soo jiidatay,

Dhanka kale, waa yar yihiin xarfaanta qirsan in dumarka &
ragga ka simanyihiin garaadka & kartida. Sidaa

daraadeed, qoraalkan kooban waxaan ku baran doonnaa
qalanjo qurux & aqoonba loo dhammeeyay oo si fudud u

kashiftay quraafaadkii Qorraxda laga aaminsanaa
qarniyaal badan.

--

Qorraxda oo ka mid ah balaayiinta xiddigood ee heehaaba
hawada maran

“space” ayaa xiriir & xannaanayn joogta ah waxay u
muujisaa noolaha dul dagan dhulka oo ah meere “planet”
aan daqiiqadna ka maarmi karin qosolka qorraxda! Dadka
oo ka mid ah noocyda malaayiinta ka badan ee ku dul
nool dhulka ayaa iska jecel in sheekooyin mala-awaal ah
laga sameeyo wax-walba oo ay ku wareeraan ama garan
waayaan. Dadku markii ay garan waayeen samayska
dunta hoose ee qorraxda ayaa sida dhaqanka ah waxay
iska dhex dabaasheen huu-haa & ku tiri ku teen la yaab
leh.

Muddo aanan sidaa u sii fogayn ayay dadka waxay ku
baraarugeen farsamo cusub oo casri ah oo si qurux badan
loogu qeexi karo sameyska dunta hoose ee dunida &
waliba nolosha.

Qaabkan cusub ee casriga ah “ science” wuxuu daaqadda kala baxay dhammaan quraafaadkii & ku tiri kuteenadii dadka ku mashquul-sanaayeen qarniyo badan.

Dadkii hore waxay rumeysnaayen sheeko xariir ah in qorraxda laga

sameeyay dhammaan walxaha dhulka ka buuxa “earth material” oo kale oo ay la mid tahay dhuxul dab dulsaaran oo holaca ka baxaya ay ka dhasheen dhamacda & fallaaraha iftiinka ah ee tooska ugu dhaca oogada dhulka & dhafoorada dadka.

Waqti ku aadan sanaddii 1925 ayaa qalanjo lagu magacaabi jiray (Cecilia,Payne) oo u dhalatay dalka Britain, waxay si qurux badan u qeexday walxaha “maters”ay qorraxda ka samaysantahay.

Waxaa yaab leh sida aqoonyahanad (Cecilia) ku ogaatay sameyska dunta hoose ee qorraxda. Qalabka afka qalaad lagu dhaho “Spectrograph “ ayay hordhigtay iftiinka qorraxda ka imaanaya. Cadcadeedii qorraxda markii la hordhigay qalabka “Spectrograph” waxaa soo baxay midabyo isku dheelitiran oo la mid ah qaanso roobaad oo kale

Nasiib wanaag, aqoonyahanka ku takhasusay
maaddooyinka ay ka samaysan yihiin curisyada
“chemicals” waxay ogaayeen midabyada u gaarka ah
iftiinka ka dhasha curisyada qaar “chemicals” haddii dab
lagu shido. Sidaa daraadeed,
waxaa is yeeshay muuqaalka qaanso roobaadii ka
dhalatay iftiinka qoraxda & midabyada ka dhasha marka
dab lagu shido walxaha kala ah “ Hydrogen”
+“Helium.” Haddaba, aqoonyahanad (Cecilia Payne)
waxay hoosta ka xariiqday in qorraxda inteeda badan ay
ka samaysantahay maaddooyinka kala ah “ Hydrogen”
&“Helium.” Halkaas waxaa ka baxay quraafaadkii la,
aaminsanaa & buufiskii laga qabay qorraxda, shakigiina
waxaa baddalay waxa af carbeekda lagu dhaho “Yaqiin” oo
ka dhigan habsiimo hal baa la siistaa! Sidoo kale, (Cecilia)
waxay beenisay beentii laga faafiyay hooyooyinka &
hablaha ee ahayd in dumarka ka garasho hooseeyaan
ragga!

(Cecilia Payne) Waqtigii ay ku soo biirtay
aqoonyahanada daraaseeya, Cirka jidka loo maro “Milky
Way” aqoonyahano badan waxay buufis ka qabeen

kartida & garashada bilcaamaha! Sidaa daraadeed,
(Cecilia) & gabdho badan oo la mid ah waxay la kulmeen
cadaadis badan. Balse dadaal & daraasayn badan ka dib,
dumarkii aqoonta casriga ah soo galay billowgii qarnigii
dhammaaday waxay muujiyeen karti lala yaabey. Waa tiro
dhaaf haweenka caqli & cududba ku biiriyay aqoonta
casriga ah “Science” ee maanta aadanaha maganta u
yahay.

Oromada & Soomaalida waxaa ka dhashay gabdho
qalanjooyin ah

Haddaba, ma is tiri waxaa la gaaray
waqtigii la arki lahaa in ay soo baxaan qalanjooyin Oromo
& Soomaali ah oo sida gabadhaas ,cilmiga qalalan wax
kusoo kordhiya.

<<<<DHAMAAD>>>>

=====

#Miyaad maqasheen ceelbaa cirka ka qodan.

Somali ayaa ku maansootay "Haygu diganinee, haygu
diganin dib ujoogso, waa duulisteeniiye dayaaxaa, aaynu
dhaafneeeee"

-maqaaladeena iska gaab-gaaban qeeyb dhan ayaa ah afbarasho,siiba magac yada eey leeyihiin MIDABBADA AFKA SOOMAALIGA,

-maku soo gaartay sheekada oraneeyso , daaqad mugdi ah ayaa cirka lagu arkay ,culimadana waxeey ku magacaabeen , (Balaak hool) .

-Daluunbaa cirka kutaal miyeey dheheen ?. cidii cirka sahan u aado , haku dhaco booraanta, boholada ka qodan halkaas.

-daluun, god, booraan, bohol, waxaasoo idil waxeey tilmaamayaan god qodan kana qodan dhulka, su`aasheena waxeey tahay , hadii meel duleesho laga soo sheegay samada, magac bixintee ku haboon in loogu yeero?.

#Lacala haduu jiri lahaa Dayax sidiisaba mugdi ah , sida qoraxda noo iftiimiso , ahaan lahaa kolkuu soo baxo dayaxaas dhulkoo idil wada mugdi ka dhigi lahaa sida hadeerba kolka qoraxdu dhacdo dhulka mugdi unoqdo.

-sheekoo khiyaali ah ayaad nala aaday hadii sidaas aad idhihi leheeyd. waxaan ku leeyahay hadeer ayaan ku nool nahay nolol khiyaali ah .

bal eeg mugdi haduu yimaado sida midabada u wada qarsoomaan.

miyaad cadeeyn kartaa inuu jiro midab guduudan , cagaaran, jaale ama madoow, iyadoo mugdi jiro wax kuu iftiimayo uusan jirin?. jawaabta waa maya.

#Midabbada mar eey dhintaan miyaa jirto?.

haa weeye jawaabtu,waana markuu mugdigu soo hoydo, dayaxuma maqan yahay,gudcur haduu jiro midabada lama kala garan karo , waloow hadeer la helay miraayado habeenkii wax lagu arki karo .

waxaa hadeer suuqa lagu iibiyaa OOKIYAALÉ hadii aad gashatid habeenkii gudcur isagoo jiro ayaad wax walba arki kartaa, Kaamirad ahaan waa loogu iibiyaa suuqyada , kaamiradaas mugdiga ayeey wax duubi kartaa iyadoon wax iftiin ah loo daarin , qalabkaas weli laguma sooxirin Taleefanada caaqilka lagu sheegay , ganacsiga weli

laguma soo darin. SAMSUNG sanadka markuu gaaro 2040 miyeey kusoo dari doonaan ,garan maayo koleey.

-Doorbin ciidamada isticmaalaan oo mugdiga markuu jiro wax walba looga dhex jeedo , qalabkaas waa caan qof walbaa aragtay sidaan qabo.

waan ogaanay mugdiga in leesku dhex qarin karo,laakiin su`aasha cusub waxeey tahay majiraa

midab inta la marsado muuqaaga laba arkeeynin .

MAJIRAA RINJI QOFKII ISMARIYO UUBA DADKA KA QARSOOMAAYO?.

hadeerba waxaa jiro midab la dhahaayo mugdi waadna isku dhex qarin kartaa, habeen mugdi ah yaa kuu jeedo hadeerba. iftiin haduu jiro qofwalba waa la arkaa muuqaalkiisa,kii muruqshabeel ah & kiikalaba.

su`aal kale oo ku saabsan lacala.

hadii lacala la laablaabo dhulka & 7 samo waxa kadanbeeyo meel banaan miyaa mise?

hadii eey tahay meel banaan , meeshaas banaan meel mugdi ah miyaa mise waa meel iftiin leh,

haduu iftiin jiro halkaas Qoraxdee ayuu ifka ka helayaa
ileen waxaa niri hala duuduubo aduunkoo dhan macal
qoraxdiisa & samaawaadkiisee.ha moodin inaan ka
baxnay mooduuceenii saldhiga u ahaa maqaalkaan,
mooduucii MIDABADA, ogoow mugdi+ iftiin waxeey kamid
yihiin midabada.

cilmiga lacala ama khiyaaliga qofkaanan dhiraan-dhirin
karin farshaxaniiste malagu tilmaami karo.

Abwaan Yuusuf shaacir waxuu nooga sheekeeyay in
faraska madoow marka qoraxda jirkiisa qabato, dhaqso in
oow tiira dhigaayo, durba waa daalayaa . waxaana sabab
u ah , qoraxda ayaa sida dhinbisha ugu dheceeyso
faraska oogadiisa mana carari karo faraska madoow,
dhaqso ayuu haraad qabanayaa , qorax hadii eey jirto
faraska madoow inuu meel harqaboow ku hoos jiro ayaa
wacan.

-qofka wato dhar madoow iyadoo qorax jirto waa lamid,
Somalida dhar cadcad beey qaataan markeey qorax
jirto.Shinida hadiii eey barafuun kaa dulcarfiso weey kusoo
weerartaa iska jir.siiba shini guureeyso.

#Taariikhda amaanta Fardaha SOMALIDA.2000 SANO
KAHOR.

-hadii aan sooyaalka waxyar kasoo xigano inagoonan sii
dhex maquuraneeynin,si qoraalkeena u ahaado mid iska
gaaban xogbadana eey kadhax muuqato.

-qoom hada kahor noolaa ayaa waxeey dheheen ,Dad
waa Hiliiniyiin & insooraacdo.

inta sooraacdana waa BARBAR.

giriiga ayaa sidaas dhihi jiray ,

-Carabta iyana waxeey dheheen , Dadwaa carab &
insooraacdo.

intasooracdana waa Cajam,.waxaad maqleleysaa Carab
& cajam.

waxaa loola jeedaa inta kasoo hartay carab waa cajam.

Carabtii hore marka eey ka hadlaayaan Somalida waxeey
dhihi jireen , "BARAL-CAJAM"

ama "BARBAR AL CAJAM"

dhulkaas waxaa loo yaqiinay kasoo bilaaw JABUUTI ILAA
MAMBAASA, dadka degan ayaa Barbar ladhihi jiray .

buugaagta sidaas baa kuqoran , kadaalaco Ibnu Khaldun & Ibnu batuuta.

Ibnu Khaldun Buugiisa waxuu kusheegay nin gabayaa carbeed ahaa kaasoo noolaa 2000 sano kahor gabay oow ku amaanaayo Fardaha qoomiyada Barbarka looyaqaano, fardo kuwa ugu fiican waa kuwaas eey dhaqdaan Barbarka ayuu ku maansooday gabyaagaas lagu magacaabo IMRU QEEYS.

"وبلاذ بربرة التي ذكرها إمرأ القيس في شعره
وليسوا من البربر الذين هم قبائل المغرب ثم بلد
مقدشو."

sheekadaas ujeedka aan usoo xiganay ayaa ah in aan sheegno, somalida fardahooda waa la amaani jiray kumanaan sano kahor.

#Magacyada & Noocyada Fardaha

Gammaan waa magaca guud ee la isku yidhaahdo (fardaha,dameeraha,baqlaha,farowga)Mawduucan waxaan kaga hadlayaa noocyada fardaha xagga midabbada & magacyadooda

Fardahihii ku noolaa geyiga Soomaaliyeed waxay ahaayeen 7 nooc oo lagu saleeyay midabbadooda .

#Midabbada Fardaha

ASHKIR : waa Farsaka cas oo aan midab kale ku dhexjirin , timihiisuna cas yihiin

XAMAR : waa faraska cas balse ay timihiisu madow yihiin waana laba nooc (mid bunni xiga & mid casaan xiga)

BULLAALE : waa faraska cad laakiin caddaankiisa uu ku jiro dambari , timihiisa & minjihiisuna madow yihiin.

QAAJE : waa faras caddaan khaalisa ah oo aan midabbo kale ku dhexjirin

CAYNAB : waa faras madow dhuxuli ah oo aanuu midabkale ku dhexjirin

BOOD: waa faraska cad oo caddaankiisu cawlaan xigo

BAROOR : waa faras aan hal midab lahayn ee midabbo badanoo isku jira leh (afar midable)

=====

#marbaan iri FARASKEEYGA ASHKIRIGA AH

Ashkiryahaw adiga heedhe , haku dhicin boholada , ka tilaabso booraanta.

hadii eey sheekada xumaato, leeyna maago, iyadoo leey dhahayo ,

Ashkir ma lihid mana fuuli taqaanid, sidaas hadii leey dhaho , aniguna

waxaan dhahayaa Diyaarada Baska hawada duusho ninka fuulay baan ahay, maalintii arooskiisa.

-ninkii geeljiraha ahaa maxuu yiri ?.

ninkii suuqa geeyay daawad norigteeda, tii loogu magac daray FIIL "FIILEEY, DAAWAD NIRIGTEEDA"

hashii geela eheed ayuu soo iibiyay diyaaradna waa kuraacay lacagtii.

waxuu yiri geeljirihii, Diyaaradeey faqiir kuma fuushana.

waa runtiis faqiir miyaa diyaarad fuulayo?

run ahaan faqiir waan ahaye ogsoonow.

#Midabka Guduudan wanaag & xumaanba .

-midabkaas guduudan waxuu xusuus ka yahay dagaal xinjiraha dhiiga ayaa lagu xusuustaa,

muuqaalka midabkaas xoolaha xitaa majecla , waa daawateen sidaan filaayo dagaalka Dibiga & ninka

marada cas walfinaayo, TV.

-SOOMAALIDA dhexdeeda midabka casaanka ayaa ugu magacyo badan sidaan soo aragnay .

qoomkii jeclaado midabka casaanka ah waxaa laga dhedhensan karaa in eey yihiin qoom jecel dagaalka,dil & dhiig ladaadiyo macno daro.

soomaalida hadii eeysan sidaas eheeyn maxeey magacyo badan ula bexeen midabka casaanka ah?.

Faras guduudan faa-iido maleh, Yuusuf shaacir baa sheegay arinkaas.

midabka sooraaco casaanka waa midka madoow, isagana waa magacyo badan yahay.

-AMAANTA MIDABKA GUDUUDAN.

-Fad galbeed & Fad arooryaad ayaa jiro waana marka qoraxda soobixirabto cas-casaanka waaberi, sidoo kale marka eey qoraxda dhici rabtana waa qurux. labada jeerbo aduunka waa isla qiray in midabkaas qurxoonyahay.,sagal ayaa lagu magacaabay inuu qurxoonyahay suugaanta ka aqriso.qeeybaha danbe ayaan kuqornay.

-Dadkaa jecel Ubaxyada nuuca casaanka ah.

#umuuraha lo`da.

dibiga yeertiisa waxaa loo yaqaanaa Dinaaho.

codka lo`da dhedig waxaa looyaqaanaa Banaaxo.

(gabay:laba dibi dinaahyeeyn kasiman jeereey diriraane.)

-MIDABADA LO`DA:

midabo badan oo tirabeel ah ayeey leedahay lo`da

midabada qaarkood waa asali , halka qaarka kalana yihiin

qaar dhalmo ah (asal & farac)

-Beey= neef lo`aad oo qaarka hore madoow.

-Haycad=waa neef lo`ah oo midabkiisu cadaan caadi ah yahay .

-Dhiin=waa neefka lo`aad ee guduudan

-Cariif.Careef:waa midab lo`aad oo cadaan sida cudbiga ah.

-Giirka/Girka = waa neefka loda ah ee midabo badan iskugu jiro.

#heesta lo`da.

Beeyga dhalayoow baaqi maahide barqo soo noqo.

-Haycadkiyo xeerada cirkaa xiiso looqabay.

-Dhiin mudiicoow adaa dhiil weeyn oo dhita utaal lagaa buuxshaa.

-caanaha lo`da.

falfalxood,waraasi,kasoofeen.

garoor.

MAGAAL!

Erayga magaal, oo laga soo dhiraandhiriyey magaalo, waa midab ka mid ah kuwa madow ee lo'da.

Lo'da iyada waa Nugul , layiri labada hore biyo hakula jirto labada danbana coows.

laba maalin haraad & gaajo uma adkeeyan karto.

-dhedhenka dareemayaasha 6 ah ayuu kamid yahay,dhedhenkaa lagu kala gartaa,suusac,& dhaayda.karuur & mayac.

=====

#MIDABBADA GEELA

Midabbada geela maxaa ka taqaan?

Siddeed suulleey Sagaal midableey!

Sagaalkaas waa saddex, saddex kale dhalay baa la yiriye maxaa ka taqaannaa?

Saddex midab oo casaan ah.

- Mayey cas
- Casaan dhicir ah
- Tin guduud

Saddex midab oo madaw ah.

- Madaw bacad.
- Madaw sugul.
- Dubbe suulal madaw.

Saddex midab oo caddaan ah

- Dayr-cad
- Caddaan xoosh ah
- Caddaan xaruur ah.

=====

Midabbada geelu ka kooban yahay.

1-GAAF (B. Gaafmadoow – T. Gaafdhalaal).

2-MAY (B. Maygarow – T. Maydhalaal).

3-DACAR (B . Dacarmadoow – T. Dacardhalaal).

4-GADUUD (J. Casaan – T. Xay).

5-CADDAAN (B. Suumaal – T. Fiil – J.Fiilgarow ama Fiilgireed).

Haddii aan midabbadaas kuu sii kala tilmaamo

1-Gaafku midabka dameeruhu ay u badan yihiin markii nooca baroonka ah laga reebo oo noocooda gareyska ah geeluna waa leeyahay oo waa gaafdhalaal, noocooda madmadoow geela u midab eyna waa gaafmadoow.

2-Maygu waa midabka kareemka loo yaqaan ee cawsha nooceeda eelada loo yaqaanno ay leedahay oo kiisa xagga baroonka soo xiga waa maygarow, kiisa caddaanka xigana waa maydhalaal.

3-Dacarku waa midabka baroonka ah oo kiisa xagga madowga soo xiga waa dacarmadoow, kiisa xagga mayga ama kareemka xigana waa dacardhalaal.

4-Gaduudka noociisa qummaatiga u gaduudan waxaa loo yaqaan Casaan, halka kan lo'da loo yaqaan dhiin, Gaduudka noociisa qafiifka ah ee xagga caddaanka soo xiga waxaa loo yaqaan xay ama xaay, lo'duna waa la mid oo sidoo kale dadka haddaad xaayoow & xayle, xiish, xaynoosh & gabar xayoon la leeyahay maqashid la soco inuu ilmahaasu cas yahay, Sidaasoo kale geedka xayeha la yiraahdo waxa magacaas loo siiyey inuu diirkiisa cad u sabab yahay.

Caddaanka nooca midabka riyaha leh suumaalna waa la yiraahdaan, caddaanna waa la yiraahdaa, waxaase cajiib ah in geelu sida dadka uu midab baroonda ah leeyahay oo waliba labada nooc ee ay baroondadu u qaybsanto ee kala ah baroondada (silvarka) & goldhanka lagu kala sheego oo kan fiilgireedka gaduud baa ku yara jira, kan kale waaba silvarkiyoo caadi ah, in kastoo aan ku tilmaami karo midab sii dabar-go'ayo.

=====

#Nuucyada shabeellka u kala qeeybsamaan.

Shabeelka qaaradda Aasiya wuxuu leeyahay xariijimo
huruud & madoow ah, laakiin noocyada ku nool qaaradda
Afrika wuu ka midab duwan yahay. Sidoo kale, waxaa jira
Shabeel midabkiisu caddaan yahay oo loo yaqaanno
Shabeelka Cad

#JEEGAAN/ QAANSA ROOBAAD.



lahjada MAAGA waxaa lagu dhahaa sida baraha bulshada
aan ku arkay

-DALUUL JIID/DARUUR JIID.

-ABOYOOW UDUBSHE.

-CAASHO CARAB DHEER.

-UDUBKI ABOOY XAAWI

-[Qaamuus lajhada Maayga cid hoowl kaqabato waa loobaahnaay qofkii
kansho heli karo ,naga kaafinkaro. xitaa Qaamuus Luqada Canfarta
maadaama walaalo nahay]

=====

#sheeko jacbur ah kuna saabsan midab barasho.

qisada waxeey ku saabsantahay nin xaasle ah ,kaasoo xaaskiisa kala tashanaayo midabyada. dukaanka lagu iibiyo rinjiga inta nuuc eey hayaan, midkuu reerka usoo doori lahaa ayuu kala shoowrayaa xaaskiisa.

ujeedka loo curiyay waxeey tahay qaabkee utilmaami karnaa midabka kuu muuqdo markaa tagtid carwada lagu iibiyo RINJIGA?.

#gacaliso dhanka midig waxaa marsan midb cad sida caanaha ah ama nuuriyada.

gidaarka xigana midabkiisa waa baxri , rinji namuunkiisa yahay dahabi weey hayaan dadkaan

,laakiin kuraasta nootaalo midabkooda maadama uuyahay qaxwi ,garbasaarka aad qaadatidna cadees yahay waxaa ila quman inaan qaadano midab coowlan , dadka qaar ayaa ka helo basali laakiin midab xabxabi ah qofkuu, umuuqdo, waa aniga.

-midbaan soo xusuustay midab cawlan sida maarta ah derbiyada lama mariyo. midab baxri ah ayaa ku wacan gidaarada, si aad usoo xusuusatid marwalba Bada.

-maaleeyo ayeey hayaan ma inooga soo qaadaa ,maaleeyo hadii aan kuu sii macneeyo waa rinji madoow ,wuuna qasanyahay .

-midabdoorin in lagu sameeyo gidaarada gurigeena waan isla garanay taas .

rinji midabkiisu yahay caddaan caawl ku dheehan ma inooga sooqaadaa ?

huruud cagaarxigeen ah weey haayaan ,casaanboor ayaa iga hormuuqdo , laakiin qofkee iibsanaayo midabkaas, xusuuso casaanboor waa Midab casaan ah oo caddaan & madow ku dhafan yahay.hurdi cagaaran weey hayaan dookhaaga haduuyahay.

midab aan layaabay ayaa marsan derbi horteeeyda ah , gidaar midabkiisu cawl yahay.

madoonayo midabkaas. midab cawlan waxaa leh Libaaxa, dad cunkaas inaan soo xusuusto majecli."Shaashka libaaxa kii ushanleeyjiray midabkaas ha marsado gurigiisa"

sheey midabkiisu isdhalanrogo ayaa iga hor muuqdo
kuna dhex jiro dhalo.

sheey leh baro badan oo kala jaad ah waxaa la dhahaa,
baraacuud laakiin xoolaha

ayaa leh midabadaas , nalkaan iga hormuuqdo ee marba
midabka doorsaday sida jirjiroolaha

Nal-baraacuudle ayaan naanees uga dhigay , nalkaan
magaalada ayaa dhashay iyagaana magac ula bixi doono

.

- shiilmadow guriga ma inoogu sharaxaa, shiilmadow
waxaan ula jeedaa dhagxaan gubatay
madoobaatay dhuxul noqotay , irida ma inoo hordhigaa ,
qofkii soo agmaro

hasoo xusuustee meel gubatay.

-Rinji caddaansadaf ah ayaan inoo sooqaadayaa midkaas
baa ina anfacaayo.

[= Midab caddaan xigeen ah oo dhalaal ku jiro.]

-suuliga midabka aan usoo qaaday waa midab
casaanboor ah.

[=Midab casaan ah oo caddaan & madow ku dhafan
yahay.]

-midab cawlan casuus&cawiif &caynabka
madoow,dhiinmeged, dhalaal culay ah,galayax quruxdiisa
qaaje lamidab ah .intaasoo midab hadii aan meel kuwada
hoorsho waxa kaaga soo muuqandoono soow kuma
magacaawna, garaammurux?.

[galaammurux. =Waxyaalo aan isku midab ekayn oo isku
darsamay oo midab hor leh oo isku googoo'an yeeshay.]

-Geela ,hasheenii midabkeeda waa fiil,yacnii waa danbari
soow kumaan daawad siin kolkaan dalxiis ugukacnay
buurta daalood.

faras midabkiisu ashkir yahay baan kugu soodoonay
casaan biyobiyo ah sida mareer bislaaday .

faras midabkiisu yahay Qaaje quruxna loodaayay , faras
qaaje,midabkiisu waa cadaane qurux haloodaayo .

faras midab kiisa ceeynab yahay waa madoow culaya,
kaas cidna ha iska siinin .

(baroor midakii leeyeey ka talaabso boorasnta). madow
culaya ceeynab buni xigeen ah cida haloo keeno.

halkaas aan ku hakiyo ka sheekeentay midababda
fardaha waanba ku ashqaraarnay quruxda midabadooda ,

gar weeye in lagu indhadaraandaro daawashadooda.
nugaal baa lagu dhaqaaye daawasho moow baxnaa.

-miyaad cabteen weli shaah calaw ah caanaha lagu
badinin ,xareed calas ah midabkeeda waasaas.

-gabar/gabadh, garbasaar cadeeys ah ayaan wataa kutiri
waa lamid,laakiin cadeeys tiq ah ayaa jiro caano xigeen
ah.

-cagaar rasiin ah, ama cagaartiq ah ayaa jiro.

-cagaar cadaan barxay ayaa jiro

-madoow cadaan barxay.

-guduud cadaan barxay.

-guduud jaale barxay

-guduud barxay midabka maarta .

-midabcireed caano kudheehan. mise buluug cadaan
barxay weeye.

-midabka cas inta magac ee looyaqaano. /guduud/ dhiin/
cilaan/ casaan./roobladhac/
/midab-dhiig/ashkir./

=====

#midabyada geelu yeesho

-bacad=midab caddaan ah oo mid kale ku dhafanyahay
oo geelu yeesho

-dawaaad=midab madow oo khadka u eg oo awrta
qoodha ahi ku yeelato qadaadka

-dayrcad=midab cad oo geelu leeyahay.

fiil=midabka cad ee geela

-gaaf=midabka geel ee madow xigeenka ah

-goodircad=midab geel oo ah madow

#dawaaad=midab madow oo khadka u eg oo awrta
qoodha ahi ku yeelato qadaadka.

--

-Gabadha ku weeynaatay magaalo aanan weligeed miyi
tegin TV-na ka daawan umuuraha geel dhaqashada
,qaabka eey u hadleeeyso waa sidaan.

-Dawaad makasaayi, geelna madhaqanin.

- qofka sidaas dhahayo waxaan dhihi lahaa. Diiq
majoogaa xaafadiina diiqa kiisa ninka ah ayaan kawadaa,
diiqa kiisa dhedig lama rabo. , dhaqo soo qabo diiqaas,

eeg dufta qoortiisa kutaalo dawaad midabkeeda waa kaas.

Wiilka Haawd(Hoowd) ku koray ee iga xanaaqi rabooow, maqal hadalkeeyga.

-Ha idhihin waad u geftay Afka somaliga .uma aanan gefin. waxbaan xeeriyay ee garo .

nin hadlaayay baa yiri Geel badan oo isugu jiray niman & naago.gefkaas udul yeelataye.

heygu durdurine dib ujoogso. cirka daluunbaa kutaal sida lasoo sheegay bal erey bixin ku haboon ukeen. god-duleelo dhulka ayaa laga damoodaa, dayaxa meel kasareeyso hadii laga soo sheegay maxaan sameeynaa , sacabka qoraxda maqariyo (balaak hoolna) waa sidaas, sida eey kudoodayaan dadkaan dusheena dugan.

-Bohol ayaa cirka kutaalo . mugdi miyaa mise waa madow, mugdigase madow miyuu-xisaabsan yahay mise waa qaxwi. fad galbed danbari ayuu sii noqdaa waxa gigana waa mugdi mise waan qalday ,casaan buu ahaa.

=====

#quruxeey midabkaaga waa kee. jaale & gaduud madow
& cadaan cagaar & buluug yaa kudhalay oon kugu
tilmaanaa

-qurx baa iskufaantay, saalayiri sheego midbkaaga.
"dayaxa kubiir yirina, dahabi iftiimay ileeyka bixinaayo waa
aniga"kolcii dushiisa lategay ee salaan loogu kacay
waxaa la ogaaday in midabkiisa yahay sida deebta ,
Danbas.

.qoraxbaa, aniga tiri ,kolkaasaa layiri midab gaar ah
baadleedahay ,Dadka weey ku garteen lana soo ogaayay
midabkaaga siduu yahay.

.Daa-uuska soobiir igu dara qorshaha yiri, quruxdeeyda
daawada.isagana waxaa loosheegay midabbada dushiisa
ku xardhan suuqyada waa lagu iibiyaa.

-haloo garnaqo qurux midab ugaar ah hala siiyo ayaa la
yiri.

laakiin waxaa lagaran waayay ,halka gartaas lagu qaadi
karo, dhulkaa yiri aniga sali aan idiin noqdo , isagana

waxaa loosheegay dhul ahaan inuu dhinac xigo, dhoowr-
midable baatahay ayaa la yiri.

-Cirkaayiri anaa dhexdhexaad ah garta iidhiibta, saa layiri
dhanbaad lajirtaayoo waxaa tahay buluug, suu yiri isoo
taabo, saa layiri inoo keena doorbin, marwalba oo
ladamco in cirka loo dhawaado sida dhaan-dabagaale
waa sii dhaqaaqaa, kolkaas, ayaa garta isaga loo dhiibay
ileen wax midabkiisa aanan lasoo taaban karin isagaa ka
jiro aduunka

.cirka isaga waa saburadi lagu soo bandhigay QURUXDA
MIDABKA EEY LEEDAHAY.

-maanta maya ,beri aan isku nimaadno ayaa lagu
balamay.

qoraxdii godkeedii ayeey gashay, dayaxiina sooma
hoyanin , mugdi ayaa jiray , qisadii maanta laga dooday
waxaa wax ka ogaa, gaaraa-bbidhaan.

nuurkiisii yaraa ayuu la, ashqaraayay isagana haleeygu
daro ayuu dhahay ,saalayiri marka waaga baryo imaaw
barxada quruxda lagu soo bandhigi doono, gaaraa-
bbidhood wuu ogaay hadii mugdiga laga baxo inaan
nuurkiisa la arkeeynin , ma aadin waa iska joogay ,wuxuu

soo xasuustay qisadii dhexmartay DOORSHAAN &
DAYAXA,

Saxaro-walwaal ayaa yiri dayaxeey waan ku caashaqay
waan kudoonayaa, seey tiri haye laakiin dhulka sii nadiifi
meel gudaafad ah kuma soo degi karee.

Abwaan Soomaaliyeed ayaa yiri Dayaxa & bada waa
isguursan rabaan , marka dayaxu 14 jirsado bada sali
ayeey noqotaa , kolkii mudi lagaarana bada weey
xanaaqdaa weey necebtahay mugdiga.

(aan dib ugu laabano qisadii quruxeey midabkaa.)

waxaa lagaaray maalintii lagu balamay , waxaa barxadii
soo buux dhaafiyay aduunka inta midab ee dultaalay xili
roob da`ay ayeey eheeyd ,

-rinjiyaal ayaa cirka loogeny roobna waa da`aayay
JEEGAAN ayaa kadilaacday halkaas.

casaan-guduud

gacaar-jaale intaas kamafoga quruxda
intaas ayaa kasobxday.

dadka waxey sheegaan in dahabka & luulka & daa-uuska
& midabada fardaha yeeshaan intaas ayeey ku dhex
qarsoontahay quruxda midab ahaan .

-wax miyaa kadhiman ood xasuusa-taayood kuder i leheed
adiga .

qisada dayaxa & doorshaanka, carabta ayeey ka timid .

waa curinteyda tan midabbada isu faanay.

-gaaraabbidhood./gaaraabbidhaan =Cayayaan yar, duula oo

qaarka dambe ku leh maaddo iftiin bixisa habeenkii.

=====

#Midabada Asaasiga.sida websaaydka noogu dhigan.

[www.wikipedia]

Midabada Asaasiga waa midibada ugu muhiinsan inta
midib ah oo jiro kana mid ah kuwa laga sameeyo
midibyada dameeriga, jaalaha, sharbeedka, oranjiga &
kuwo kale oo badan. Midibyada muhiimka ahi waxaa la
yiraahdaa casaan, cagaar, baluug, cadaan, Safkaani waa
midibyada oo dhan.

Mugdi =waa caksiga (ka soo horjeedka) iftiinka.

Sharaxaada saxda ah waa maqnaanta (la'aanta) ileyska.

Marka meeli noqoto iftiin la'aan waxaa adkaata in wax la arko sababtoo ah waxay noqotaa madoow. Isha

bani'aadamka waxba ma arki karto marka meeli bilaa iftiin tahay, sababtoo ah araga waxaa caawiya iftiinka ileyska.

#BASALI

Basali = waa midab casaan badhxaan ah, kaasi oo inta badan lagu arko ubaxa, Midabka basaliga ah wuxuu magaciisa ka helay khudaarta basasha oo u midab eg yahay.

Midabka basaliga ah waxaa markii ugu horeeysay la isticmaalay qarnigii 17aad.

--

Basli, waa midab ka samaysan iskudhafka (iskudarka) labo midab oo kala ah casaan & buni, ama casuus & casaan jaamud ah.

Marka laga fiiriyo muraayada (dhalada) Kumbuyuutarka, waxaa midabkan laga sameeyaa iskudarka buluuga & casaanka.

Marka la iskudhex daro sadexda midab ee Casaanka,
Cagaarka & Buluuga ayaa sameeya midabo badan
kuwaasi oo ka mid yahay midabkan basliga ah.
Samayskaas dhexdiisa waxaa midabka basliga laga helaa
buluuga & casaanka dhexdooda.

#MIDABKA BAXRI

Baxri, waa midab cagaar-buluug xiga ah .Iskudarka
midabada

Marka la iskudhex daro sadexda midab ee Casaanka,
Cagaarka & Buluuga ayaa sameeya midabo badan
kuwaasi oo ka mid yahay midabkan baxriga ah.
Samayskaas dhexdiisa waxaa midabka baxriga laga helaa
buluuga & cagaarka dhexdooda. Sidoo kale waxaa
midabkan lagu helaa marka la kala goynayo (jarayo)
midabada ayadoo la isticmaalayo habka afka qalaad lagu
yidhaahdo 'CMYK color model, taasi oo midabkani ka soo
dhex baxo cagaar, madoow & buluug.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa la isku raacay in midabkan la isticmaali jirey 4000 sano kahor.

Guud ahaan, midabkan waxaa lagu isticmaalaa meelo badan; waxaa ka mid ah qalabka wax lagu daabaco (printer), Kumbuyuutarka, Telefishinka, diiradaha wax lagu sifeeyo & meelo kale. Waxyaabaha ugu cajiibsan ee midabkan waxaa ka mid ah, markuu la falgalo (lagu daro) midabka casaanka waxaa meeshii madoowga ahayd isku bedeshaa cadaan.

#Liini:

Liini =waa midabka u dhexeeya casaanka & huruuda, waana midab la sameeyo wakhtiga wax la rinjiyeeynayo. Magaca midabkan waxaa laga keenay khudaarta liinta. Guud ahaan, midabka liiniga ah waxaa loogu magacdaray midabka liin macaan bislaatay (taasi oo ah midab huruud & casaan khafiif ah).

#CAWLI

Kani waa midabka cowlka. Haku Qaldin midabka kale cowlaan & xayawaanka cawl.Cowl.

-Cowli =waa midab fudud oo giriftan ahaan u dhaxeeya madoowga & cadaanka. Midabkan waxaa lagu tilmaamaa dhexdhexaad, taasi oo macnaheedu yahay waa midab "bilaa midab ah".Waa midabka daruuraha cirka, dambaska.

#CASUUS

Casuus = waa midab ka samaysan iskudhafka (iskudarka) labo midab oo kala ah casaan jaamud ah & buni.

Marka laga fiiriyo muraayada (dhalada) Kumbuyuutarka, waxaa midabkan laga sameeyaa iskudarka buluuga & casaanka.

Iskudarka midabada

Marka la iskudhex daro sadexda midab ee Casaanka, Cagaarka & Buluuga ayaa sameeya midabo badan kuwaasi oo ka mid yahay midabkan casuuska ah.

Samayskaas dhexdiisa waxaa midabka casuuska laga
hela buluuga & casaanka dhexdooda.

=====

#Magacyada Soomaalida ee midabada ka soo jeeda .

Magacyada Soomaalida ee midabada ka soo jeeda.

Soomaalidu waagii hore magac waxay ula bixi jireen siyaabbo
badan, mid walbaana wuxuu lahaa duluc iyo ujeedo lagu
saleeyo.

waxaan isku dayeynaa inaan bal wax ka taataabano,
Magacyada midyada la halmaala.Magacyadani midabyada inta
aan hadda uruurshay waa intan:

Awaare, Bootaan, boodhle, Beyle, Magad, Caynab, Barni, Sagal,
Yusur, Calas,Calaso, Ciid, Gaduudo, Dhiin, , Galayax,
Haldhaa,Maygaag, Shiil, Hurre, Hirre/Hire,
Qaaje,Sugulle,Dugul,Dugulo, Hiirad , Ashkir, Ashkiro,
Caddey,Cadde, Caddaawe, Cawl, Cawlo, Xoosh, Xoosho, Xareed,
Halac, Bullo,Bullaale, Casayr. Huruuse, Haybe, Tuke, Culay,
Dayax, Cadceed, Xamari, Xamaro, Xayle, Dhuxul, Dhuxulow.
Olol, Gorod, Ciiro, Galaal, Cawsey, Kaaha. Kaahiye. Hilaac, Xidig,

-Magacyada midabyada iyo iftiinka Afka qalaad laga soo
eregsaday.

(Siraad, Faynuus, Tariig, Dahabo, Canab, , Nuur, Nuuro, Timir, Timiro, Casuur, Casuuro)

Dhiin, Dhiimo, Xamari, Xamaro waa midabka casaanka.

Beyle oo madow tilmaamaya.

-Magacyada laga soo dheegtay midabka dhulka

Awaare, Bootaan waa siigada.

-Magacyada laga soo dheegtay dhirta.

Yusur, Maygaag, Magad, dhuxul,,dhuxulow.

Culay iyo Haybe oo tilmaamaya madow culus misana ifayana.

Timir, Timiro, Barni waa midabka maarriinka ah.

Canab iyo Cawsey oo tilmaamaya midab cas.

-Magacyada ilayska ka yimid

Iftin, Ileys, Dayax, Cadceed, Olol, Qorax, Halac, Kaaha, Kaahiye, Cadde, Caddey, Caddaawe, Faynuus, Tiriig, Nuuro iyo Siraad, oo tilmaamaya casaan iyo caddaan.

-Magacyada laga soo dheegtay xayawaanka

Cawl, iyo Xayle waa midab casaan xigeen.

Haldhaa, Huruuse, iyo Gorod waa midab madow.

Galaal iyo Barre waxaa loo bixiyaa wiilasha calaamad jirkooda
ka muuqata lagu arko, badanaana calaamaddaasi waa madow.

=====

#DOOD FURAN

-majiraa midab cagaar & Dameeri mugdi ah ?

-BAXRI halka aan ka dhihi leheeyn hadii aan ku bedelno
kawarama

(Midab Badeed. maadaama hadaba aan dhahno midab
cireed)

#sidee lagu garan karaa macag bixinta cusub?

xarafka (i) ayaa udanbeeyo tusaale: Cinabi,

Baxri,Liimi,Buni,iwm.

Somalida hadii eey ku murmaan erey afsomali ah waxeey
isula gardhigtaan

dhaqanka. suugaanta ayaa laga baaraa,buugaagtiisana

lasoo baalal roгаа,

weligaa suugaanta ma ku dhex aragtay ereyadaan

[Cinabi, Baxri,Liimi,Buni,xabxabi]

kasoo baara suugaantii hore 1900-2000 ,dad ama duunyo
iyadoo lagu amaanaayo ereyadaas.

Abwaankeena HADRAAWI sidan ayuu ku amaanay
gabadheena

*(Laan dharab ka toostiyo hibooy dhool cas baad tahay
Dhalankaagu waa luulka & dhirahay yaaquud
Malaa roob la dhaca waad taqaan dhiinka jookha leh)*

taasi waa aragti laakiin waxaa jirto iyadana aragti midaas
kasoo horjeedo

waxeeyna leedahay midabo badan ayaa jiro kuwaasoo ku
dhamaado xarafka (i)sida MUGDI.

waana iska muuqataa in oowsan eheen mid macmal ah
erey bixinta MUGDI .

-sheyga midabkiisu dambaska yahay hadii aan ku
magacaawno DAMBASI bal kawarama ?.

-Dayaxu midabkiisu waa DAMBASI.

-Timirta midabkeeda waa bunni , bal kawarama hadii aan dhahno,MIDAB TIMIREED/ TIMIRI.

-DAMEERI/ Dameeraha imisa midab ayeey leeyihii?
Gumburi Dameeraha ayuu xisaabsan yahay mana ahan dameer ,dameer faloowga giir-giiran , dabcan kaas loolama jeedo ereybixinta midabka DAMEERI marka laga hadlaayo, laakiin waxaa fiicneeyd , dameeri waxa loola jeedo in siwacan loo qeexo.

-CINABI/sidaas ayaad ku magacaawdeen, waa iga su`aale imisa nuuc ayaa jirto cinabka.
cinab cagaaran waa jiraa kaas miyaad ula jeedeen mise kankale ee madoow xigeenka ah .

(CAYNABI)sidaas maxaad ugu magacaabi weeyseen ileen faras madoow xigeen ah waxuu daaqayaa Nugaal hadii aanan qaldaneeyn, qof juquraafi kuliito waanba ahay.

-CAGAAR BARXAN / GADUUD BARXAN/ MADOOW BARXAN .

sidaas sax maahin waayo waxaa loo baahan yahay in laqeexo midabka guduudan waxa barxay .

waa in la dhahaa Guduud, madoow barxay, ama cagaar jaale barxay.

waxaan idin leeyahay coowska jiilaal waa lama huraan, erey bixin kale ma heeysano ,
midiina ayaa hirgashay , iyaga ayaana adeegsigeeda lagamaarmin , laakiin ceebaha eey leedahay ereybixintiina ayaan toosh ku iftiimiyaa mar walba.

-XABXABI/ midabkaas isagana ereybixinta lasiiyay farbaa ii taagan adeegsigiisa dood ayaan ka qabaa.

xabxabi siyaabo badan ayaa loo fahmi karaa, dusha sare ee qaraha miyaad ula jeedaa mise?

qeeybta laga cuno qaraha.dusha sare waa cagaar , hadii aan isdabaaliyana sidaas waan uqaadan karaa.

meelkale, aan wax kaa tuso,carabta qudaar waxaa jirto eey ku magacaabaan "baathijaan/baatijaa/Aswad"

somalidana ASWAD ayeey dhahaan waa qudaar sida bocorka ukuusan dushana ka madoow dhexdiisana waa cadaan

qudaartaas waxaa loogu magacaabay ASWAD
maqaarkiisa ayaa madoow laakiin dhexdiisa waa cadaan .
bal miraayada isku eeg. waxaan ula jeedaa. erey bixinta,
aad siisay XABXABI bal eeg, waxaad ula jeedaa
xabxabka dhexdiisa, ee dusha sare ulama jeedid.
bocorkaasna marka aad magaciisa ugu weceeysid
waxaad ugu yeertaa
ASWAD, dusha sare maqaarka xigo ayaadna sidaas u
dhahday .

-carabta qofkeey amaani rabaan waxeey dhahaan waa
sida BAATIJAANKA dubka sare ayaa madoow maahine
dhexdiisa waa cadaan . "ALBUHU ABYAD" ayeey
dhahaan masaarida.

haka eegin dhanka cunsuriyada , inaga ayaaba caaynay
faraska midabka madoow.

ulamana jeedno jinsi caayid.

-KIRLIGA DABKA SAAR ,KAALAY SHAAH KARSANEE.
imisa ayaa loo qeeybiyaa midabyada shaaha.

-shaah cadeeys ah , mid bigeeys ah ama shaah jinji ah .

soow uma jeedid shaah guduudan ayaa lagu magacaabay
shaash rinji ah .

JINRI= guduud.

RInji= midab , laakiin lama qeexin nuuca midabkaasi
yahay

Dood furan .

barax asal ahaan waxaa loo yaqiinay caano barxan .
midab ahaan cadeeys barxan majiraa , haduu jirana
midabkiisa waa sidee?.

cadeeys markiisii hore waxuu ka yimid shaah gududan
lagu daray caano, markaas ayaa la helay cadeeys isagii
ayaa ah gacan kusameeys.

shaaha waa nuucyo batay, mid cagaran ayaa suuqa
lakeenay, mid jaale ahna jidkuu kusoo jiraa, marka
sheekada cadeeyska dib haloogu noqdo .

hadii aan aniaga bilaawo abla-ableeynta magac ubixinta
midabyadaas waxaa ila quman in aan ukacno dhinacaas.

-inta aanan teyda soo bidhaaminin bal aan wax ka
tilmaamo dadkii hore sida eey ula bixi jireen magacyada
midabada hada aan adeegsano macag yadooda.

-caano biyo lagu daray barax ayeey dheheen.

Biyo samada kasoo hooray roob ayeey dheheen.

markuu dhulka ku dhibcay roobkii biyo xareed ayeey dheheen , xareeda hadii eeysan saafi eheeyn xareed calas ah ayeey dheheen .

--

-cadeeys kayimid cagaar cadaan barxay.

-cadeeys kayimid huruud cadaan barxay

-cadeeys kayimid bun.

-cadeeys gacar cadaan,madow cadaan

.-cagaar jaalo barxay.

-cagaarjaale

-guduud-cagaar.

-madoow-cadaan .

-madoow jaale waaba ladhahay dadka qaar iyagoo sidaas meelaha qaar kusoo qoraayo waan arkay laakiin cadees waaye hala ogaado.

-indhawaleeynta igadaa!

indhawaleeyn waxa kuugu riday waa midab, waana kan lacagta kamuuqdo muraayada.

-maalmaha ciida dharka qurxoon waxa lagu xusho waxeey kuxirantahay qaabka midabkiisa, midkaad calmatid maalintaas.

- markaad daawaneeysid TV waxa ugu badan indhahaaga sixrayo, aadan uga agtegi karin waa midabbada isku dheeli tiran .

#jir jiroole mana sixray, midabkiisa, amuusan badalin indha sarcaadlee ameey tahay sheekada.

-kawaran hadii aad xiratid muraayado madow ah, ciida soow kuulama muuqato midab nuuc kale ah, isagana amuu sidaas yahay isbadalin midab kiisa laakiin inaga uun moodnay inuu midab doorsaday.

=====

#falanqeeeynta Bun & qaxwo

-qashirka bunka ayaa qaxwada laga sameeyaa .

buni hahii layiri ma qaxwada ayaad ula jeeday mise bunka.

bunka madoow hadii caano lagu barxo miyaa mise qashirka bunka oo caano lagu barxay ayaad ula jeeday. iyadana waa su`aal.

-ha isku qaldin midabbada.buni ayaa jiro sidoo kale qaxwi hadaa idhahday sidaas., cadees buni ah majiraa,mase jiraa cadees qaxwi ah.

-midabka lagu daro wax cad ayaa cadees la dhihi karaa. laakiin midab madow hadii lagu daro midab jaale ah cadees lama dhihi karo. sax miyaa sidaas.

#Magacyada midabada oo leesla meel dhigo waa guul weeyn oo somalida leedahay.

-sidee fiican in aan yeelno midabyada magacyadooda. mawaxaa inoo fiican in aan kasoo qaadano , midabyada xoolaha & dhulka & bada & cayayaanka & geedaha, mise waxaa fiican in macyada aan kasoo qaadano tignoolajiyada

sida, PC iyo mobilka magacyada looga yaqaano.[HTTMAIL/CSS].....aniga aragti ahaan waxaan raac sanahay qeeybta sare, waan kabaqay tignoolajiyada waayo selfadhiyo maleh, maalin walba wax cusub ayaa kusoo kordhayo, laakiin noolaha kale midabkiisa ma ahan mid isbedel kudhaco , arintaan waa mid ubaahan in somalida isla meel dhigto, jaamacadaha

Hargeeysa kafuran dhexdooda waa in eey ku midoobaan ereybixino si ardayga ugu wareerin. ,Muqdisho kuwa kafuran iyagana sidaas ayaa wacan in eey sameeyaan, ereybixino lagu mideeysan yahay layimaadaan .

#Adeegsiga midabbada ,waa dhaqanka lagu garto magaalo.

-Ibnu khaldun hadii la weeydiiyo su`aal ah, ka shaqeeynta midabbada & adeegsigiisa & soosaarka rinjiga, hoowl magaalo miyaa mise waa dhaqanka reer miyiga. waxuu ku jawabi lahaa waa dhaqan reer magaalka lehay.

-waxqorida, adeegsiga qalinka, dhigaal buug lagu dhigo, waxaa leh dhaqankaas reer magaalka, sidaas Ibnu khaldun ayaa qalin kudhigay qalad & sax waxeey ahaataba, kaasi waa fikirkiisa.

#maktabada dhexdeeda midab aanan lagu suubin karin majiraa, hadii oow jiro hadeer midab aanan la abuuri karin

, soow macquul maahan in lahelo mustaqbka-dhaw qalab
sahlayo in midabkaas warshad soo saarto la helo.
ma haboona in lagu doodo taas waayo maalinwalba
cilmiga waa mid sii hormaraayo . midabkaas lama
sanceeykaro. xujo yaanan laga doonin halkaas.

#dhaan-dabagaale midab maleeyahay, haduusan laheeyn
biyahana waa sidaas , Somalida waxeey dhahaan biyaha
midabkooda waa madoow."biyo madow ayeey dhahaan"
laakiin marka rinji madow lagu qaso biyaha maxaan
dhahnaa biyahaas, hadana biyo madoow miyaan ku
magacownaa?.

qofkii aanan aqoon dhaan-dabagaale sideen ugu
macneeyn karaa, qaabka oow uegyahay ?.
waa qasab lahjada Hargeysa in aan adeegsano
/widhwidhka qoraxda waaye .

(hadii aan qorno wirwirka qoraxda ."carcar ,wirwir agteeyda imaaw)

- cadceed kulul widhwidhka duhurkii kolkeeytahay dhaan-
dabagaale waa kaas .

=====

#SUUGAANTA. LOOGA HADLAY MIDABADA .

#Suugaanta & siyaabaha loogu dhex adeegsaday kala
saafida midabbada.

-gabayo,amaan quruxda aduunka la, amaanayo ama
gabar midabkeeda .

Cirka oo daruuruhu
Midab wada cillaaniyo
Ku dhigeen canjiidaha
Xilli ay cadceeddii
Dhar cashmiira xidhan tahay.

--

Daarahan casuustaleh
Kolba midab la doortiyo
Diibka lagu mariimee

Waxa dhaygag ii diley
Midabadan dhinbiilaha
Dharka wada xariirta ah
Midba dheeha gaarka ah

Nal magaalo daaray & kala wacan mugdiga baas.

Midabbada dhabeesha ah

Qurux daadan maydhee

Fardo Adari joogiyo

Ashkirkii Nugaashoo,

Indhahaagu ruuxii

Sal-fudayd ku eegay

Ashqaraar ku ridayaan

Afkaan midabka luulka leh

Ninka eeday waa ani.

Xido shaalku leeyahay xidigtii dagaaraay

xili mooda galabeed xinjiraha guduudtiyo xararyada

sibaaqa ku dul xidhatay caadkaay

jeegaan isxaydoo midabada xariirta ah .

--

dayaxoo xinaystoo intuu xooray daahii

cirka xero ka oodto xaadiisi muujoo dhulka xubin

madawbayd ku xureeyay nuurkaay.

qoraxduna xanjaarkiyo xabadkeeda feydeey , xagal fiiqan
kaahii kaga soo xugeysaay.

Ma googooska sagalkiyo
Gamasyada shucaacaa,
Ma cigaalka feleggiyo
Cir-jiidhkii Mariikh baa?
Ma magool cusayb baa?
Ma cadceed arooryoo
Fallaadhaha casuusta leh,
Ku cabsiisay dhedadoo
Ceeryaanti didisaa?
Ma xareed is-celisaa?

Ma habeen cadda ahoo,
Balliyada cigaagani
Casuumeen xiddigahoo;
Cirka dayaxi kaa jirey
Dhulka kaa cawaray baa?

"Jeegaana waa lagu mislaa, jaah ku midableeye"

[Waxeey noola meel tahay
Dibigii madoobaa
& midabka dhiinkiyo
Kii maqaar cadaagee]

[ubax midabka beyga leh
casaankuna bu'da u yaal]

midabkaagu waa nuur.
-Midab dhiiniyo casaaniyo
Jeegaantoo dhamaysina
Dheeha midabadeeda
Dhig dahab la moodoo

Caan bay ku tahay qurux.
Casaan midabka eegmada
Cirridkiyo timuha madow
Ilkaha caddaanka ah

Haddii barni aan ku baro
Bilicda quruxdeeda guud.

Midabku waa boodh casaan
Timuhu waa baalal goray
Dibnaha bishintuna madoow
Ilkuhu waa bayl cadoo
Indhuhu buluc weeye oo
Baalasha sunniyaha xardhane
Dharkay qabto waa buluug.!!!!

=====

Dhulka oo cagaaroo
Cosobkii dul-saarraa
Isagaan car-jabin weli.

--

Calcalyada xareeddii
Halka godan cuslaysiyo
Fiid-cawl horraantii
Cirka oo daruuruhu
Midab wada cillaaniyo
Ku dhigeen canjiidaha
Xilli ay cadceeddii
Dhar cashmiira xidhan tahay .

Todobaatan midableey
Madow & casaanneey
Maariin dhallaalaay.
Maartii dhalaashee
Aan moodey dahabkee
Milantee caddaatee
Isku miir dillaacdaay.

Midabada la sooc soocay
Dadkan tobanka saamood leh.

--

Waxan ahay nin midabbeeya oo maalinbays rogae
Muuqaygu gelinkiiba waa muunad goonniyahe.

Sooc sooc dhirtoo
. Ubax saaranyahay
. Sagal & daruur
. Seerma waydo roob
. Dhibic siisayoo
. Subixii cadeed
. Sayixii dhulkiyo

- . Dharab seexday ay
- . Ku sintooy falaadh
- . Midabada sibaaq
- . Kala saartayooy
- . Ku salaantay nuur
- . Casarkii si leeg
- . Sugul & casaan
- . Ku sagootidoo
- . Isha saayataa
- . Qurux saamigeed .

Midho curdana ubax kala midaba, muunad lala yaabo
 Millicsiga il-doogsiga arlada, oo laga maqsuudaayo.
 Adaa doog madow & caleen, maalmo soo bixin.

-----=====

XIGASHO:::

[#Magacyada iyo Noocyada Fardaha/WQ: Mnuur Ladane/2020]
 -cusman axmed maxmud.[GEELA SOOMAALIA]
 -Zakariya Xasan Maxamed.2017.Webiga Shanta Midab
 -Cabdullaahi M. Cawsey.Buugiisa,100 qali iyo .
 -Magacyada Soomaalida ee midabada ka soo jeeda W/Q Burhaan Cali
[://www.youtube.com/watch?v=ey0mPG8x7os](https://www.youtube.com/watch?v=ey0mPG8x7os)
[://www.youtube.com/watch?v=7YnvcJOUGYo](https://www.youtube.com/watch?v=7YnvcJOUGYo)
[//laashin.com/](https://laashin.com/)
[//biciid.com//](https://biciid.com/)
[//www.zekagraphic.com](https://www.zekagraphic.com)
[//www.almrsl.com](https://www.almrsl.com)
[://www.youtube.com/watch?v=IKL09EsWIQ](https://www.youtube.com/watch?v=IKL09EsWIQ)
[://www.youtube.com/watch?v=53VIClCMGhI](https://www.youtube.com/watch?v=53VIClCMGhI)

//QAAMUUSKA AFSOOMAALIGA//

ABWAANADA. gabayada kasoo xiganay.

: caaqil Waddo .

:Gaariye.

:Hadraawi.

:Keyse Hassan Gabobe.

:Dhoodaan.




:weedhsame.




NOOCYADA FARDAHA


	ASHKIR faras cas oo aan midab ku dhaxjirin
	CAYNAB faras madow oo midab kale ku lamaanayn
	QAAJE faras cad oo midab kale ku lamaanayn
	BOOD faras cadaankiisu casuus ku jirto
	BULLAALE faras midabkiisu dambari yahay oo timihisa iyo luguhu madow yihiin
	BAROOR faras midabo isku dhax jira leh (afar midab leh)
	XAMAR faras cas oo timihiisa iyo lugihiisa maodw yihiin

BY: ABDIRAHMAN BARRE



	+		=	
YELLOW		ORANGE		YELLOW-ORANGE
	+		=	
RED		ORANGE		RED-ORANGE
	+		=	
RED		VIOLET		RED-VIOLET
	+		=	
BLUE		VIOLET		BLUE-VIOLET
	+		=	
BLUE		GREEN		BLUE-GREEN
	+		=	
YELLOW		GREEN		YELLOW-GREEN






Buluug & inta ka farcantay



الألوان

العربي	الإنجليزي
١ لون	Colour/color
٢ لون فاتح	Light colour
٣ لون غامق	Deep colour
٤ لون معتم	Dark colour
٥ صبغة	Paint
٦ أبيض	White
٧ أسود	Black
٨ أصفر	Yellow
٩ أحمر	Red
١٠ وردة	Rose
١١ وردي	Rosy
١٢ أخضر	Green
١٣ أزرق	Blue
١٤ رمادي	Gray
١٥ أسمر	Brown
١٦ قرنفلي	Pink
١٧ أرجواني	Purple
١٨ ياقوتي	Ruby
١٩ قرمزي	Scarlet
٢٠ بنفسجي	Violet
٢١ شفاف	Transparent



Color	الشفرة	اللون	#
White	#FFFFFF	أبيض	1
GhostWhite	#F8F8FF	حليبي = شبحي	2
WhiteSmoke	#F5F5F5	دخاني	3
Silver	#CCCCCC	فضي	4
Gray	#888888	رمادي	5
JIIR/DOOLI	#908070	فيرانى	6
Purple	#770077	أرجواني	7
Fuchsia	#FF00FF	قرمزي = فوشي = بوصي	8
	#DDAADD	برقوقي	9
Mauve	#E0B0FF	موفي	10
Lavender	#E6E6FA	لافندري = خزامي	11
	#FFE8EE	برميتي	12

	#FFE8EE		برميتي	12
Pink	#FFCCDD		وردي	13
Apricot	#FFCCBB		مشمشي	14
PeachPuff = Wheat	#FFDDBB		خوخى = قمحي = حنطى	15
	#EEAA55		خريزي	16
	#FFAA66		رملي	17
	#FFA000		كرمى	18
Orange	#FF8800		برتقالي	19
Tangerine	#EE8800		يوسفي	20
Salmon	#FF8866		سلموني	21
Coral	#FF7755		مرجاني	22
Pumpkin	#FF7718		قرعى	23
Tomato	#FF6644		طماطمى	24
Persimmon	#EE5500		يقطيني	25
Raspberry	#E30B5C		توتي	26
Cerise	#DD3366		كرزى	27
Rose	#FF0088		زهري	28
	#DD0844		كركاوي	29


كاكي (HTML/CSS)

midab Kaaki



Islamic green	#009900	بسمي	63
Green	#00CC00	أخضر	66
Turquoise = Teal	#008888	فيروزي = تركوازي	67
Aqua = Cyan	#00FFFF	مائي	68
	#00BBFF	سماوي	69
Azure	#0077FF	لازوردي	70
Purple Violet	#8800FF	بنفسجي	71
	#880088	نهدي	72
Blue	#0000FF	أزرق	73
Indigo	#4F0080	نيلي	74
Navy	#000088	بحري	75
Sapphire	#082266	ياقوتي	76
	#006600	مدهم	77
	#004400	أخوي	78
	#223366	كحلي	79
	#442255	ليلكي	80
Eggplant	#604050	بالنجاني	81
Charcoal	#444444	فحمي	82

Red	#FF0000	أحمر	30
Cinnabar	#E04433	زنجفري	31
Brick	#BB2222	طوبي	32
Rust	#B8400F	صلني	33
Mahogany	#C04000	ماهوغوني	34
	#883333	عودي	35
Byzantium	#702860	علاي	36
Maroon	#880000	ماروني = خمري	37
Auburn	#663311	كستاني	38
Brown	#994400	بني	39
	#8F281F	عسلي	40
	#C4947E	أسمر	41
Copper	#B87733	نحاسي	42
Goldenrod	#DDAA22	ذهبي	43
	#DDBB88	خشبي	44
Flax	#EEDD80	كتاني	45
Cream	#FFFDD0	كريمي	46



midabka
Haramcadka



shabeel hindi
ama shabeelkii
Aasiya



Buluug
(muud, Cread)

Cinqbi

Başalı

Qaxwe
(boodiy, Bunni)


Casaan xigeen
(casaan barxan)

Dambasi
(dameeri, Ciro)

Cadays

Dahabi

Ivory	#FFFFF0		سري	48
Snow	#FFFAFA		ثلجي	49
Beige	#F5F5DD		بيج	50
Lemon	#FFE800		ليموني	51
Mustard	#FFDD55		خرنبي	52
	#EEE888		كبريتي	53
Yellow	#FFFF00		أصفر	54
	#88FF00		عشبي = حشيشي	55
	#88DD55		ريبي	56
	#88DD88		تفاحي	57
Malachite	#0FDD50		مرمري	58
Emerald	#50C878		زمردي	59
	#55A088		فستقي	60
Xanadu	#738678		عفني	61
	#AAA066		حرجلي	62
	#98904F		كموني	63
Olive	#888800		زيتوني = زيتي	64










garanuug



Qaaje



Midabada Jaamudka

				
Casaan	Liini	Huruud	Huruud khafiif	Cagaar ,barxan
				
Cagaar	Buluug	buluug maari	Cadaan	Cadaan
				
dambas	Madoow	Cowlaan		

	+		=	
blue		yellow		green
	+		=	
yellow		red		orange
	+		=	
red		blue		violet



#guntii ayaan soo gaarnay waan iska soo gunaanudeeynaa
maqaalkan , aqrista yaasha laga yaabee in eey jeclaan
lahaayeen in wax looga sheego cilmigaas cusub aan soo wadno
waxa uu noqon doono, hadii aan wax yar kasii iftiimiyo , waa
cilmi xiriir la leh MIDABADA, waa cilmi loo curiyay wax qurxin

darteed, waa CILMI AAN KU MAGACAABI DOONO DAAUUS
QURUXDIISA,

waa cilmi qaali ah isticmaalkiisana qof awoodeeda leh ayaa
qarashkaas ka bixi karo,DAHAB &LUUL QOF JEEBKIIISA QOYAN
YAHAY AYAA IIBSAN KARO.

cilmigaas waa balan in oow noqdo mid aan bulshada kusiino si
bilaash ah wax lacag ahna kuma doonayo .

qurxintaas DAAUUSKA waaba waxaad sugtaa goordhaw.

<<<<DHAMAAD>>>>